

Ku dhaqan Xafiis D.

FAAFINTA

الرسمية

OFFICIAL



RASMIGA AH

الجريدة

BULLETIN

EE JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

Sanadka 4aad

FAAFIN SANADLE

Muqdisho

2016

Waaxda Maamulka Faafinta Rasmiga ah
Ee Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda

Uruurinta Sharciyada iyo Wareegtooyinta ee Jan-December 2016

Qiiimaha waa \$XXX Dollar, lambar waliba – **RUKUNKA:** Sanaddii waa \$XXX Dollar, Soomaaliya gudaheeda – Dibaddeedana waa \$XXX Dollar. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo. Qiiimaha Qoritaanku F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa \$XXX Dollar – Rukunka iyo Qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah – Lacagta waxaa lagu bixiniyaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Maaliyadda.

KOBNIIN

BOGGA KOOWAAD

SHARCI

W.M

BOGGA LABAAD

XEER

BOGGA SEDDEXAAD

TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGAYSIIS, IWM

SANADKA

2016


TIX: GSH/01/12

Kalfadhiga: 1aad

Fadhigiisa 4aad

QARAAR GOLAHA SHACABKA

28^{ka} Agoosto 2012



Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Golaha Shacabka

QARAAR GOLAHA SHACABKA
KU SAABSAN

DOORASHADA GUDDOONKA GOLAHA SHACABKA

Muqdisho 28^{ka}, Agoosto 2012



TIX: GSH/01/12
Kalfadhiga: 1aad
Kulankiisa 4aad

QARAAR GOLAHA SHACABKA

28^{ka} Agoosto 2012

GOLAHA SHACABKA

Markuu arkay: Hadalqoraalka Kalfadhigiisa 1aad Fadhigiisa 4aad ee 28/09/2012 lagu doortay Guddoomiyaha, Guddoomiye Ku-Xigeenka 1aad iyo Guddoomiye Ku-Xigeenka 2aad ee Golaha Shacabka;

Markuu arkay: Natijada codeynta Golaha ku xusan hadalqoraalka Golaha Kalfadhiga 1aad Fadhigiisa 3aad ee 28/09/2012

WUXUU GUDDOONSADAY SIDA HALKAN HOOSE KU XUSAN:

Qodobka 1^{aad}

Doorashada Guddoomiyaha Golaha Shacabka

1. Xilka Guddoonka Golaha Shacabka Soomaaliya oo ay isu soo sharaxeen (5) shan xildhibaan, waxay wareegga koobaad cododka u kala heleen:

1. *Xil. Muxammad Sh. Cusmaan Jawaari (119) Boqol Toban iyo Sagaal Cod*
2. *Xil. Cali Khaliif Galeyr (77) Todobaatan iyo Todobo Cod*
3. *Xil. Cabdi Xaashi Cabdullahi (23) Labaatan iyo Sadax Cod*
4. *Xil. Cabdirashid Maxamed Xidig (10) Tobon Cod*
5. *Xil. Xasan Abshir Faarax (5) Shan Cod*

2. Inta aan la gudagelin wareegga 2aad ee Doorashada waxaa tartanka ka tanaasulay Xildhibaanada ku xusan Lr. 2aad, 3aad, 4aad iyo 5aad ee Faqradda 1aad ee Qodobkan,

3. Saa daraadeed Golaha wuxuu wadar ahaan isku raacay in **M.ne Muxammad Sh. Cusmaan Jawaari** noqdo Guddoomiyaha Golaha Shacbiga Soomaaliyeed

Qodobka 2^{aad}

Doorashada Guddoomiye Ku-Xigeenka 1aad ee Golaha

1. Wareegga 1aad ee Doorashada Guddoomiye Ku-Xigeenka 1aad ee Golaha Shacabka oo ay u tartameen (10) Toban Xildhibaan waxay Codadka u kala heleen:

1. *Xil. Cabdiwali Ibraahim Muudey (40) Afartan Cod*
2. *Xil. Jeylani Nuur Iikar (36) Sodon iyo Lix Cod*
3. *Xil. Bashiir Maxamed Jaamac (31) Sodon iyo Kow Cod*
4. *Xil. Maxamed Cabdi Xayir Maareeye (26) Lix iyo Labaatan Cod*
5. *Xil. Tahliil Cabdi Maxamed (22) Labo iyo Labaatan Cod*
6. *Xil. Maxamed Cali Xagaa (19) sagaal iyo Taban Cod*
7. *Xil. Ibraahim Saalax Deyfallah (17) Todobo iyo Taban Cod*
8. *Xil. Cabdalla Boos Axmed (12) Labo iyo Toban Cod*
9. *Xil. Maxamed Cumar Dhalxa (8) Sideed Cod*
10. *Xil. Cabdixakin cige guuleed (8) Sideed Cod*

2. Wareegga Labaad waxaa ku tartamay afarta ugu cod badnaatay wareeggii hore waxayna codadka u kala heleen:

1. Xil. Jeylani Nuur Ilikar (91) Sagaashan iyo Kow Cod
2. Xil. Cabdiwali Ibraahim Muudey (58) Koton iyo Sideed Cod
3. Xil. Bashiir Maxamed Jaamac (30) Sodon Cod
4. Xil. Maxamed Cabdi Xayir Maareeye (30) Sodon Cod

3. Inta aan la gudagalin wareegga 3^{aad} ee lagu kala reebayo labada Musharax ee ugu codadka badan, waxaa tanaasulay Xildhibaanada ku xusan Lr.2aad, 3aad iyo 4aad ee Faqradda 2aad ee Qodobkan:

4. Saa daraadeed Golaha wuxuu wadar ahaan isku raacay in **M.ne Jeylaani Nuur Ilikar** noqdo Guddoomiye Ku Xigeenka 1aad ee Golaha Shacbiga Soomaaliyeed.

Qodobka 3^{aad}

Doorashada Guddoomiye ku-xigeenka 2aad ee Golaha

1. Xilka Guddoomiye Ku-Xigeenka 2aad ee Golaha Shacabka oo ay isu soo sharaxeen (4) afar xildhibaan waxay wareegga 1aad codadka u kala heleen sidan:

1. Xil. Mahad Cabdalla Cawad (112) Boqol Toban iyo Labo cod
2. Xil. Cabdullahi Cusmaan Ducaale Sugulle (48) Afartan iyo Sideed Cod
3. Xil. Maxamed Cabdullahi Xasan (22) Labo iyo Labaatan Cod
4. Xil. Cusmaan Cilmi Boqorre (19) Toban iyo Sagaal Cod

2. Inta aan la gudagelin wareega 2aad waxaa tanaasulay xildhibaanada ku xusan Lr.2aad.3aad iyo 4aad ee Faqradda 1aad ee qodobkan;

3. Saa daraadeed Golaha wuxuu wadar ahaan isku raacay in **M.ne Mahad Cabdalla Cawad** noqdo Guddoomiye Ku-Xigeenka 2aad ee Golaha Shacbiga Soomaaliyeed


Qaraar

Golaha Shacabka Soomaaliya Kalfadhigiisa 1aad Fadhigiisa 4aad ee 28/09/2012 oo ay goobjoog ahaayeen (234) Labo Boqol Sodon iyo Afar Xildhibaan uuna shir guddoominaayay Xildhibaanaka ugu da'da weyn **M.ne Muuse xasan Cabdulle** wuxuu guddoonsaday oo wadar ahaan u oggolaaday:

1. *M.ne Muxammad sh Cusman Jawaari* *Guddoomiyaha Golaha Shacabka*
2. *M.ne Jeylani Nuur iikar* *Guddoomiye ku-xigeenka 1aad*
3. *M.ne Mahad Cabdalla Cawad* *Guddoomiye ku-xigeenka 2aad*

Waxaa Saxiixay _____

M.ne Muuse Xasan Cabdulle
Guddoomiyaha KMG


M. ne Muxammad Sh. Cusmaan "Jawaari"
Guddoomiyaha Golaha Shacabka